Leenka D ee cusub

Gaadiid dheereeya ayaa mariinka Route 5 dhowaan ku soo socda.

Leenka D ayaa wuxuu wanaajin doonaa isu-socodka waddada Chicago Avenue iyo Fremont Avenue.

Bas dhaqso ku socda oo la wanaajiyay wuxuu gacan ka geystaa **safar deg-degsiimo** ah iyo **waaya aragnimo istariix** ah oo lagu qaato waddooyinka ugu mashquulka badan ee Metro Transitka. Route 5 aad waa waddada baska ee ugu mashquulka badan ee Magaalo Mataanaha, iyadoo toddobaad kasta ay qaataan qiyaastii 16,000 oo macaamiil ah. Inta lagu jiro saacaddaha mashquulka, basaska Route 5 wuxuu ka dhigan yahay in ka yar boqolkiiba 2 gaadiidka taraafikada laakin waxay wadaan in ka badan boqolkiiba 20 dadka mariinkaas ku safraya.

Sidee ayuu adeegga baska degdegsiimada ah ee Leenka D u wanaajin doonaa socodkayga?

Adeegga baska dhaqso ah waa xirmo gaadiid oo lagu wanaajinnayo kaas oo lagu kordhinnayo **safarro degdegsiimo ah** iyo **waayo-aragnimo la wanaajiyay** kaas oo ay waheliyaan boosteejo la wanaajiyay iyo gawaari gaar ah oo waa wayn.

Ilaa intee ayuu dheereyn doonaa Leenka D?

Leenka D waxaa lagu qiyaasaa inuu gaarayo boqolkiiba 20 inuu ka badin doono Route ka 5 aad.

Halka uu ka joogsan la'ahaa boloog kasta, basaska joogsi kooban ayay samayn doonaan boosteejada ay joogsanayaanna boosas baa u kala dhaxeeya. Lacagta waxaa laga ururin doonaa boosteejada—waa sida tareenka yaryar ka oo kale—oo baska dhexdiisa ma aha: Marshi biyeedaha kor ayaa loo qaadayaa si ay u sahlanaato in si sahlan baska loo fuulo. Baraf xaaqis oo dhammaystiran sidoo kale fuulitaanka ayay wanaajin doontaa in xilliga jiilaalka. Basaska Leenka D ayaa sidoo kale la xiiraya nalalka taraafikada si loo soo gaabiyo nalashada casaanka.

JADWALKA MASHRUUCA HORDHACA (wuu isbeddelli karaa)

- **2016-2017** — QORSHEYN
- **2018-2019** — DEJIN
- **2020-2021** — DHISMAHA *Waxaa la sugayaa maalgelinta mashruucda*

Sidee ayaa lagu maalgelin doonaa mashruuca?

Qarashka guud ee mashruuca waa $75 milyan, $40 milyan waa la aqoonsaday. $35 milyan dheeraad ah ayaa loo baahan yahay si loo dhiso boosteejo ku fidsan Leenka D oo dhan. Metropolitan Council waxay waydiisan doonaan caddayn dowlad gobol bixiso oo maalgelin ah oo si buuxda lagu maalgelinnayo Leenka D sanadka 2018.



Metro Transit

metrotransit.org/d-line-project

Xiriirayo:
Cody Olson
dline@metrotransit.org
612-349-7390

Maxaa Leenka D uu uga duwan yahay kuwa kale?

Joogsi yar, si joogtana u socda

Leenka D ayaa noqon doona adeegga koowaad ee marriinka, iyadoo adeegga la kordhin doono habeenka iyo maalmaha nasashada.

Baska maxalliga ee Route 5 wuxuu ku sii socon doonaa xeer hooseeya ee safarrada maxalliga ee barta baska istaaggo ee hadda jirta.

Leenka D



10 daqiiqaba mar ayay soconayaan, boosteejada 1/2 maayal ayay isu dhaxeeyaan

Route 5



30 daqiiqaba mar ayay soconayaan, joogsi 1/8 maayal ayay isu dhaxeeyaan

Wakhtiyo badan oo cagaar ah ee signaalka mudnaanta

Si uu u sii socdo, Basaska Leenka D waxay sama fareejaha ay "waydiisan" karaan nalasha cagaarka hore ama inay sii dheereeyaan.ntau ntxiv.




Lacagaha horey loo bixiyo ee loogu talagalay joogsi dhaqso ah

Fuulitaan degdegsiimo ah oo albaabada oo dhan laga fuulayo, basaska Leenka D ma la aha sanduuqyada lacagta. Macaamiisha waxay iibsan doonaan tikit ama Kaarka Go-To Card waxay saari doonaan boosteejada, isla sida tareenka yaryar. Saraakiisha baliista – oo ma aha howl-wadeennada baska – ayaa hubin doona in macaamiisha ay bixiyeen lacagta lagu raaco.


Kabiska jidka qarkiis oo loogu talgalay xawaare & boos

Leenka D wuxuu ku shaqaynayaa taraafikada caadiga oo jidka ma ballaarinnayo. Beddelkeed, mashruuca wuxuu ku dari doonaa kabiska jidka qarkiis ama meelo biyaha ka saaraysa oo boosteejo badan dhexdeeda laga samaynayo.



Maanta, meelaha basas ay joogsadaan ee leenka dhanka meddig ee leh booska loogu talagalay meelaha macaamiilka.

Dib ugu darsanka taraafakada dib u dhac ay sababtaa.



Kabiska jirka qarkiisa waxay fidiyaan boos loogu talagalay boosteejada Leenka D oo waxayna yareynaysaa leexleexashada dhinac-dhinaca. Barta istaaga fog waxay isticmaali karaan signaalka mudnaanta si baska uu uga caawiyo inuu sii socdo.

Boosteejo Xaafaddo oo xarumo leh

Boosteejo ku qalabaysan waxyaabo ammaan iyo qibrad istariix, mid la mid ah tareenka yaryar. Waxyaabaha caadiga ah ee uu leeyahay waxaa ka mid ah kuleylaysi, nal, qalabyada ammaanka, xogta ambabaxa baska ee wakhtiga saxda ah iyo weelasha qashin qabtaha.



